

## **CUTUBKA LABAAD: DEEGAAMEYNTA HEY'ADDA C.B.S.**

Waxaan ku soo faahfaaninnay Cut. 1aad, wadadii dheereed oo loo soo maray abuurista Hey'addaan. Hadda waxaan joognaa bilihii ugu dambeeyey sanadkii 2014kii, waxaana hirgalay arrimahaan:-

1. Sharciiyeynta Hey'adda.
2. In Hey'adda lagu soo daray miisaaniyaddii 2014tii, wallow loo ogolaaday mushaar bilihii ugu dambeeyey sanadka, sida aan ku xusnay Cut 1aad.
3. Xoogaa shaqaale ah oo shaqada lagu billaabi karo.

Maxaa loo baahan yahay waqtigaan? Waxaa loo baahan yahay Dhisidda Hey'adda si howshii loogu tala galay ay u gudan karto.

Waxaa ku soo baxay decreetadii Madaxweynaha L.29 ee 19-11-2013 ee lagu magacaabay rasmi ahaan ADM. GAAS. Faarax Axmed Cumar (Faarax Qare) inuu noqdo guddoomiyaha joogtada ah ee Hey'adda, waxaa xil lagu saaray: inuu dowr weyn ka qaato dardargelinta dhismaha Hey'adda.

Haddaba Dhismo Hey'adeed maxay macno qabtaa?

Waxay macno qabtaa:-

1. Sharciiyeynta Hey'adda
2. Diyaarinta xafiisyo oy Hey'addu ku shqeyso
3. Qalabeynta xafiisyadaas
4. Raadinta qalabka Cilmibaarista
5. Raadinta Kaadir "Cilmibaarayaal" oo Jaamiciiyiin ah guud ahaan

Qodobka 1aad oo aha Sharciiyeynta HCBS wuu soo dhamaaday, sidi aan uga soo warannay Cut.1aad.

**Qodobka 2aad: Diyaarinta Xafiisyo oy HCBS ku shaqeyso,** Si loo fuliyo qodobkaan, waxaan ka ijaarannay guri weyn agagaarka Taliska C.Badda, ee degmada Kaaraan ka dib markii ay inoo suurtageli weysay inaan helno guri dowlo. *Waa kan sawirka gurigii Hey'addu degtay kuna jirtay dhowr bilood.*



Guriga Hey'addu shaqada ku bilowday ee Deg. Kaaraan

Gurigu wuxuu ka koobnaa 6 (lix) xafiis, hool shir oo dhammaantood loo dhameystiray miisaskii iyo kuraastii oo noocyo kala duwan lahaa.

Gurigaan sida sawirkiisa ka muuqata waa guri qurux badan waasacna ah oo laga heli karo xafiisyo lagu shaqeeyo iyo hool lagu shiro, intaa waxaa u sii dheer dhul weyn oo dhireysan baabuur bandanna geli karto. Gurigaan waxaan ku jirnay ilaa bilowgii sanadka 2015ta, markaasoo miisaaniyadda dowladda laga reebay kirada guryaha iyo xafiisyada.

Dabadeed waxaa gacan nagu siisay **Wasaaradda Boostada** in hey'addu ka hesho dhowr xafiis oon ilaa hada degan nahay.

Waxaanna mahad u jeedineynaa wasiirka, wasiir ku xigeenka, agaasimaha guud iyo mas'uuliyiinta kale oo noo fidiyey gacantaas. *Waana kan sawirkii dhismaha Wasaaradda Boostada waxaad ka arki kartaa boorka (Looxa) hey'adda CBS oo u dhaxeeya labada boor oo kala ah kan Wasaarada Boostada iyo kan Wasaarada Tamarta iyo Biyaha oo intuba wada dagan dhismahan.*




Dhismaha Wasaarada Boostada oo ay Hey'addu hadda degan tahay.

**Qod. 3aad: Qalabeynta Xafiisyada HCBS**



Xafiiska Guddoomiyaha



Waaxda Maamulka & Maaliyadda



Howlka shirarka mas'uuliyiinta sare ee Hey'adda



Waaxda Qaanuunka



Waaxda Culuunta badda

Waxaa deyn inoogu soo qaaday qeyb alaabta ka mid ah qeybna naga bixiyey:-

1. Xil Wasiir - ku xigeenka Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka  
Drs Muumino Sh. Cumar (Xaaska Guddoomiyaha Hey'adda)
2. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda Drs. Aamina Sh. Cusmaan

Runtii labadaan Gabdhood la'aantood Hey'addu shaqo ma billaabi karten, mana u hinqan karten sida ay u hinqatay.



Drs Mumino Sh. Cumar



Drs Aamina Sh. Cusmaan

**Qodobka 4aad:** Raadinta Qalabka Cilmibaarista: sida Computerrada, barnaamijyo gaar ah, khariidooyin (Maps), Kutubo Maraajic ah ... (Maktabad Takhasusi ah) iwm.

Arrintan iyada ah inooma fududeyn, haddana waxbaa inooga qabsomay, laakiin weli aad ayaan uga liidannaa, waxaanse rajeyneynaa in sanadka 2016 wax fiican inooga qabsoomi doonaan. Mas'uuliyiin ayaa wax nagala taray qodobkaan waxaana ka mid ah:-

- Guddoomiyaha Hey'adda ADM. GAAS. Faarax oo kutubo badan iyo Mapab ku soo biiryey Hey'adda oo noqday billow barako iyo maraajic aan laga maarmin.
- Danjire Ciise Cali Max'ed (Ciise Dheere) oo mar kasta uu dibadda tago inoo keenaayey dhowr Kitaab oo maraajic ah (Qaanuunka Badda & Culuumta Badda) oo wax weyn aan ka faa'ideysanay.
- Sarreeye GAAS Bashir Max'ed Jaamac (Bashir Goobe) markii uu ahaa Taliyaha NISA, wuxuu na siiyey laba Computer oon shaqada ku billownay, xag qoraal iyo xag Cilmibaariseed.



**ADM. GAAS FAARAX AXMED CUMAR**  
**(Faarax Qare)**




**Danjire Ciise Cali Max'ed**  
**Ciise dheere**



**S/GAAS Max'ed Jaamac**  
**BASHIIR GOOBE**

**Qodobka 5aad:** Raadinta Kawaadir aqoonyaha ah oo noqda Cilmibaarayaal, arrintaan mid fudud ma ahayn, haddana guul weyn ayaan ka soo hoynay, wadda dheer iyo muddo aan yareyna way qaadatay, waxaana la waafajiyey QAABDHISMEEDKA HCBS sida ka muuqata *sawirka hoose*.



Waxaan u marney xulashada baarayaasha shuruuddahaan:-

1. Inuu yahay ugu yaraan Jaamici heysta Darajada Kowaad. BA (BS) ee takhasusyada hey'addu daneyneysay.
2. Inuu hey'adda tababar ku qaato ugu yaraan 3(saddex) bilood, ayaddoo isha lagu hayo sida uu wax u baranaayo, sida uu waxgal u yahay iyo sida akhlaaqadiisu tahay... Iwm. Intaas haddii uu ku guuleysto ayaan codsi shaqaalanimo ugu qornaa guddiga shaqalaha rayidka ee Qaranka.
3. Inuu ku tababarto Cilmibaarista asagoo raacaya manhajka caalamiga ah ee Cilmibaarista
4. Inuu maqaal ku yeesho Jariiddada Juula- Juwaay si uu mustaqbalka u diyaarin karo warbixin Cilmiyeysan.
5. Inuu Qoro Kitaab oon ahayn arrin sahlan, waayo waxaan u baahannahay in maktabadda uu ku soo kordhiyo Kitaab marjac noqon kara.
6. Inuu tababar fuliyo (Macallim).
7. Inuu cashar ka bixiyo Seminaarada iyo Raadiyaasha.

Hey'addu waxay leedahay (Dec.2015) Cilmibaarayaasha hoos ku qoran:

No.	Xilalka	Tirade Jaamici/D.Sare
1.	Agaasinka sare	4 Jaamici
2.	Waaxda Qaanuunka Badda	3 Jaamici
3.	Waaxda Culuumta Badda	3 Jaamici+2 D.Sare
4.	Waaxda Deegaanka Badda	3 Jaamici+ 1D.Sare
5.	Waaxda Qorsheynta, IT, Tababarrada & Qoraallada	2 Jaamici +2 D. Sare
6.	Waaxda Dhaqaalaha Badda	2 Jaamici+ 1D.Sare
7.	Waaxda Maamulka iyo Shaqaalaha	2 Jaamici+ 2 D/sare
8.	Waaxda Xiriirka Dibadda	2 Jaamici
9.	La – Taliyeyaal	4 Jaamici
10.	WADARTA: J/DS	25/8

### **Wadarta Kaadarka HCBS:**

Jaamici: BA (BS) = 58%, MA (MS)= 25%, PHD =17%  
D/S 8  
Farsamo- yaqaan 3  
Adeege 4

### **Wadarta: 36 Shaqaale**

**Kaaderkaan wuxu daboolayaa: 85% Baahida Hey'adda**

# KAADERKA HCBS:



Guddoomiyaha: ADM. GAAS.Prof Faarax Axmed Cumar (F. Qare) wuxuu ku dhashay Gobolka Banaadir 1945, wuxuu ahaa Macallin Dug/ Hoose 1962-65, wuxuu ka qaatay AK. Ciidanka Badda (URSS) Darajada BA 1968, wuxuu ka qalinjebiyey Kulliyada AB/KA Ciraaq (1979 (MA of Military Science iyo MA K. Dhaqaalaha). Baqdaad 1980, wuxu sajiilay PHD J Qaahira 1990kii wuxuu ka qalinjebiyey AK. Istiraatiijiyada Sayid M. C. Xasan 1987 (Diploma Sare = PHD Military), Wuxuu ahaa Taliyaha C.Badda 1982-84. Wuxuu ka qalin jebiyey JUS, Kuliyaadda Dhaqaalaha wuxuuna ka ahaa Prof. JUS (Kul. Dhaqaalaha) 1967-90; wuxuu ahaa Muxaadir AK. Istiraatiijiyada Sayid M.C. Xasan 1987-90kii. Wuxuu ahaa Xil 2001-2003, Asaase Jaamacada Xamar 1999, Abaanduulaha X.D.S 2007-2008. Taliyaha C.Badda 2009-2014, Guddoomiyaha HCBS 2014.



Cabdinuur Cabduqaadir Maxamed

Gud-ku-xigHCBS wuxuu ku dhashay Deg. Baraawe, wuxuuna ka baxay (JUS); muddo dheer waxa uu ka soo shaqeeyay Waxbarashada oo jagooyin sare ka gaaray, wuxuu ka mid ahaa Xildhibaanadii Barlamaanadii KMG, sidoo kale waxa uu kasoo shaqeeyey Gudiga shaqaalaha riyadka ee dowladda, muddo waxa uu ahaa Madaxa Waaxda Qaanuunka ee Hey'adaan, hadana waa ku xigeenka Guddoomiyaha HCBS ahna Madaxa Akadeemiyada Culuunta Badda & Qawaaniinta ee H.C.B.S asaastay.



Cabaas Macalin Yuusuf

Wuxuu wax ku soo bartay dalka Malaysia BA. Economics, waa qofkii ugu horeeyey ee ka mid noqda Cilmibaarayaasha HCBS.



G/DH C/qaadir Maxamuud Maxamed

Ka tirsan waaxda xiriirka guud ahna u qaabilsanaha Sugidda Amniga guud ee Hey'adda



# CILMIBAARAYAASHA WAAXDA CULUUMTA BADDA



Eng. Cabaas Nuur Mahdi, Agaasimaha Waaxda Culuumta Badda, heystana shahaadadda 1aad ee Jamacada ( BSc. Fishery & Mechanical Engineering), Faculty of Polytechnic – Muqdisho.



Hassan Osman Hassan Roble, Waaxda Culuumta Badda, haysta (Bsc. Marine Science & Environment), ka soo baxay Jamacada Hodiedah ee Dalka Yemen.



Cabdi Raxmaan Max'ud Diiriye, Waaxda Culuumta Badda, Haystana Shahadada Kowbad Ee Cilmiga Badda Iyo Deegaanka (Bsc. Marine Science & Environment) Jamacadda Hodeidah-Yeman.



Xasan Abuukor Nuur, xubin ka tirsan Waaxda Culuumta Badda, haystana shahaadada Dugsiga Sare ee Badda ahna khabiir xagga Kalluunka muddo dheerna badda ka shaqeynaayay.



Xasan Maxamed Jimcaale (Testa), xubin ka tirsan Waaxda Culuumta Badda (khabiir Sakhadda Badda & Bacoolaha), haystana Shahaadada Dugsiga Sare ee Badda.

# CILMIBAARAYAASHA WAAXDA QAA NUUNKA BADDA



**C/raxiin Warsame Diiriye** agaasimaha Waaxda Qaanuunka, waxa uu ku dhashay Qardho ee G/Bari wuxuu Qaanuunka ku soo bartay Kulliyada Shareecada & Qaanuunka ee Jaamacadda AL- AZHAR.



**Maxamed Xasan Maxamed**, ka tirsan waaxda Qaanuunka wuxuu ku dhashay B.BURTO, Sharciga waxa uu ku bartay Jaamacada Islaamka ee Muqdisho Soomaaliya.



**Sacdiyo Sh. Cumar Maxamed**, ka tirsan waaxda Qaanuunka, heysatana shahadada 1aad ee jamacadda (Bachelor of Law) jamacadda Hamar, Muqdisho- Soomaaliya.

# CILMIBAARAYAASHA WAAXDA BII'ADDA BADDA



Mustafe Xasan Nuur, Agaasimaha Waaxda Bii'adda, haystana Shahaadada 2aad ee Jaamacadda (Master of Environmental Management) kana Qaatay Jaamacada Kampala International University (KIU), Kampala - Uganda.



Anas Cali Madar, xubin ka tirsan Waaxda Bii'adda, hastana shahaadada 2aad ee Jaamacadda (Master of Biotechnology Program), kana soo qalin jabiyeey North South University – Bangladesh.



Cabdilaahi Maxamuud Diiriye, ka tirsan Waaxda Bii'adda haystana Shahaadada labaad ee Jamaacada (Master of Puplic Health) kana soo qalin jabiyeey Kampala University (KU), Kampala – Uganda.

CILMIBAARAYAASHA WAAXDA  
QORSHEYNTA, IT, TIRAKOOBKA,  
QORAALLADA, FAAFINTA & KEYDINTA



Saciid Xasan Abiikar, Agaasimaha Waaxda Qorsheynta, IT, daabacaada & Faafinta wuxuu Qaanuunka ku soo bartay Dalka Pakistaan.



Bashiir Maxamed Cabdi, waaxda Qorsheynta & Tirakoobka, Qoraallada Faafinta & Keydinta, heystana shahada 1aad ee jamacadda (Computer Science of Information Technology) kana qaatay jamacadda Horseed International University.



Bile C/laahi Maxamed, waaxda Qorsheynta & Tirakoobka, Qoraallada Faafinta & Keydinta, heystana shahada 1aad ee jamacadda (Computer Science) kana qaatay jamacadda Plasma University.



Cusmaan Faarax Axmed ka tirsan waaxda Qorsheynta heystana shahaadada D/Saree, khabiir sawirkaqaade, IT & farsama yaqaan.



Xuseen Maxamed Tuuryare, ka tirsan waaxda Qorsheynta & Tirakoobka, Qoraallada Faafinta & Keydinta, heystana shahaadada Dugsiga Sare, khabiirna ku ah howlaha Daabacaada



C/wahaab Muqtaar Cabdi, ka tirsan waaxda Qorsheynta & Tirakoobka, Qoraallada Faafinta & Keydinta, heystana shahaadada Dugsiga Sare, khabiirna ku ah xaga daabacaada.

# KAADERKA WAAXDA XIRIIRKA GUUD



Maxamed Cisman Cumar, K/S Ag waaxda Xariirka guud kana baxay Kuliyaadda Lafoolle Jamacadda Umadda (Bachelor of Geography).



Max'ed Axmed Max'ed, ka tirsan waaxda xiriirka guud, heystana shahadada dugsiga sare.



Axmed Cabdi Daahir heysta Shahaadada 1aad Nurse ee Jaamacada Plasma, ka tirsan Waaxda Xiriirka Guud.

# CILMIBAARAYAASHA WAAXDA SECTORKA DHAQAALAHA BADDA



Axmed- Bashiir Maxamed Cali, K/S Agaasimaha Waaxda Sectorka Dhaqaalaha Badda Laureato in Ecomomia 1988 Gahayr Jamacada Ummadda.



Axmed Cumar Abshirow, ka tirsan waaxda Dhaqaalaha Badda, heystana shahadada 2aad ee jamacadda (Master Degree in Business Admin-Finance and Banking), jamacadda Kampala International University.



C/qaadir C/laahi Cumar, kana tirsan waaxda Dhaqaalaha Badda, heystana shahadada dugsiga sare.

# SHAQAALAH WAAXDA MAAMULKA, SHAQAALAH & MAALIYADDA



Mumin Max'ed Mayow, Ag waaxda Maamulka, Maaliyadda & Shaqaalaha, heystana shahadada 1aad ee Jamacadda (B A. Business Adminstration) Jamacadda SIMAD University.



Ifraax Yuusuf Xasan, ka tirsan waaxda Maamulka Maaliyadda & Shaqaalaha, heysatana shahadada 1aad (Bachelor of Geography), Jamacadda Muqdisho University.



Axmed Nuur Xiirey, Waaxda Maamulka, Maaliyadda & Shaqaalaha, heystana shahadada dugsiga sare, Khibradna u leh maamulka shaqalaha.



Indiris Abuu Maqafaay Darawal



Cali Muuse Maxamed, Darawal



Safiyo Abuukar Axmed Nadiifiye



C/laahi Xuseen Axmed Adeegge



Cismaan Wehliye Xuseen Adeegge